



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Abril 27, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Maamuusida Kathryn Weit

Waa murugo weyn in aan maqalnay geerida ku timid Kathryn Weit. Kuwa idinka ka tirsan ee ku soo lug yeeshay u doodida dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinku (I/DD) iyo qoysaskooda ayay u badan tahay in ay yaqaaneen ama maqleen iyada, waanad ka faa'iideysatay shaqadeeda aan daalka lahayn.

Kathryn waxay jeclayd wax u doodida. Waxay ahayd qof wax la qabsada. Waxay la shaqeyn karaysay guddoomiyaha gobolka iyo sharci-dejiyayaasha waxayna macluumaadka adag u turjumi kartay dadka sameynayay shaqada wax u doodida si ay si wadajir ah ugu gaari karaan hadafkooda.

Waxay ahayd qof aan daalin, oo mar kasta la heli karo, maskax badan oo qof kaftan badan. Waxay waalidiinta ka caawisay fahamka ah in ay runtii noqdaan horseedka carruurtooda oo jid u dejiyaan inta noloshooda ka hartay. Waxay iyadu lahayd hab ay uga caawiso waalidiintu in ay dareemaan karti iyo kalsooni.

Hal tusaale ahaan, waxaan u baahanahay baaritaannada taariikh dembiyeedka ee daryeel bixiyayaasha, qayb weyn oo ka mid ah, waxaa sabab u ahayd wax u doodistii Kathryn. Waxay bixisay caddeyn wanaagsan iyada oo sharraxaysa sababta ay muhiimka u tahay in la yeesho daryeel bixiyayaal wanaagsan oo guriga yimaada waxayna si aad ah uga shaqeysay in baaritaannada taariikh dembiyeedka laga dhigo kuwo

la iskaga baahan yahay. Waxay sidoo kale ahayd qof si adag ugu dooda Fairview Trust, oo aqoonsan muhiimadiisa ah in uu yahay astaan rajo ah iyo dadaal si aan mar kale dadka reer Oregon ee qaba I/DD meel loogu dirin/lagu hayn 'institutionalize'.

Maalin kasta, nidaamkayagu waxaa sii xoojiya dadaalka iyo wax go'aaminta u doodayaasha awooda leh. Dad badan, Kathryn waxay u ahayd xiddig iftiimeysa oo wax u dooda. Kathryn waxay saameyn nololeed oo waqti dheer leh ku yeelatay dad badan iyo dhaqanka nidaamkeena adeega. Waxaan u mahad celinaynaa qoyska Wiet wadaagida ay sanado badan ay nala wadaageen u doodaha wanaagsan.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.